

# Miyay ahayd inaad ka soo Guurto/Cararto Musiibo? Ka Helida Farmashiyaha Dib-u-buuxsashada Daawooyinka ee Xaaladaha Degdega ah

## **S1. Goorma ayay farmashiyayaasha Oregon sameyn karaan dib-u-buuxinta xaaladaha degdega ah ee daawooyinka uu dhakhtarka qoro?**

J. Farmashiyayaasha ayaa tani u sameyn kara qof ay qasbay ku noqotay inuu ka tago aag ay saameysay masiibo la sheegay.

## **S2. Farmashiyadee ayaa samayn kara dib-u-buuxinta daawooyinka ee xaaladaha degdega ah?**

J. Farmashiye kasta oo Oregon ku yaalo ayaa ku siin kara dib-u-buuxinta daawooyinka ee xaaladaha degdega ah. Waxaa la doorbidaa, mararka qaarkoodna sahlan, in la isticmaalo isla shirkadii buuxisay/ku siisay dawadii hore.

## **S3. Goorma ayay farmashiistayaasha Oregon sameyn karaan dib-u-buuxinta daawooyinka ee xaaladaha degdega ah iyadoon la haysan warqad dhakhtar oo ansax ah?**

J. Haddii farmashiistaha uu rumeysan yahay in daawada loo baahan yahay si loo joogteeyo caafimaadka bukaanka ama loo sii wado daaweyn aasaasiga ah, farmashiistaha ayaa sameyn kara dib-u-buuxinta.

## **S4. Muddo intee le'eg ayuu farmashiistaha u buuxin karaa?**

J. Dib-u-buuxinta daawooyinka ee xaaladaha degdega ah waa inaysan dhaafin ugu badnaan sahay ku filan 30 maalmood.

## **S5. Sideen dib ugu soo buuxsadaa daawadayda haddii aan lumiyay daawadii aan haddeer haystay?**

J. Tag farmashiye kasta oo ku yaalo Oregon, waxaa la doorbidayaa mid katirsan isla shirkadii kuu sameysay buuxintii hore, oo codso dib-u-buuxinta xaaladaha degdega ah oo ah sahay ku filan 30-maalmood.

## **S6. Miyuu farmashiiste dib u buuxin karaa walxaha la xakameeyo marka ay musiiibo jirto?**

J. Xaaladaha qaar. Caadiyan, tani waxay u baahan tahay in farmashiistaha uu helo oggolaansho hordhac ah.

**S7. Ma wax kharash ah ayay lahaan doontaa daawada degdega ah?**

J. Malaha. Farmashiyaha wuxuu biilka/kharashka ku dalici doonaa shirkada caymiska sida caadiga ah, waxaana jiri karta wada-bixin/qaybta lacagta ee jeebka laga bixiyo.

**S8. Kawaran haddii aanan qabin caymis, ama ay igu adkaato in daawadayda dib la iigu buuxiyo aana ku caysanahay Qorshaha Caafimaadka Oregon (Medicaid).**

J. Haddii aadan qabin caymis ama aad qabtid su'aalo kale oo ku saabsan helitaanka dib-u-buuxsashada daawooyinka ee xaaladaha degdegga ah, Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo. Imayl uga dir Barnaamijka Kormeerka Daawada uu Dhakhtarka Qoro ee Maamulka Caafimaadka Oregon halkan [OHA.pharmacy@state.or.us](mailto:OHA.pharmacy@state.or.us).

**S9. Maxaan sameeyaa haddii ay igu adkaato in dib la iigu buuxiyo daawadayda oo aana ku caysanahay shirkad caymis oo gaar loo leeyahay?**

J. Macaamiisha waxaa lagula talinayaa inay la xiriiraan shirkadooda caymiska ayna la shaqeeyaan farmashiyahooda si daawooyinka dib loogu buuxiyo loona bixiyo kharashyada. Haddii macaamiishu dhibaatooyin la kulmaan, waxay u-doodayaasha macaamiisha gobolka ka wici karaan 888-877-4894.

**Helitaanka Dukumiintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us).